

# Kusaabsan
# Help Me Grow

Help Me Grow waa nidaam taageerooyin ah oo loogu talagalay haweenka xaamilada ah, daryeelayaasha haya dhallaanka cusub, iyo qoysaska ay u joogaan carruurta yaryar ee qaba dib u dhacyada iyo naafooyinka korriinka.

Adeegyada iyo taageerooyinka waxaa lagu bixiyaa Booqashada Guriga iyo Barbaarinta Caruurta, iyadoo labaduba qoysaska ka taageero korna u qaado koritaanka caafimaadka qaba iyo koboca dhallaanka, carruurta yaryar iyo qoysaskooda.

Department of Children & Youth

Help Me Grow

*Adeegyada iyo taageerooyinka waxaa laga heli karaa gobolka oo dhan, waxaana bixiya xirfadlayaal ku sugan deegaankaaga.*

## Ka agdhawow adeegyada Booqashada Guriga ama Barbaarinta Caruurta maantaba!

Foomka gudbinta onlaaynka ka buuxi **www.helpmegrow.org.**

Wac **(800) 755-GROW (4769)** si aad ula hadasho khabiirka qabashada.

Somali: November 2024

# BOOQASHA DA GURIGA



Department of Children & Youth

Help Me Grow

**www.helpmegrow.org**

# BARBAARINTA CURUURTA



# Tiro ahaan...

**95%**

In ka badan **95%** ee waalidiinta Ohio ee adeegyada Barbaarinta Caruurta u helay dhallaankooda waxay sheegeen inay si wanaagsan awood ugu yeesheen in dhallaankooda ay ka taageeraan barashada waxyaabo cusub iyo kasbashada xirfado cusub.

**80%**

Adeegyada Help Me Grow waxay gacan ka geystaan kobcinta cilaaqaad caafimaad leh, waayaaragnimo, iyo deegaano lagu taageero horumarka maskaxda, **80%** oo kamid ah waxay dhacaan kahor saddex sano jir.

**48%**

Haweenka xaamilada ah ee kaqeybqaatay Booqashada Guriga waxay **48%** aysan u badneyn inay dhalaan ilmo miisaankoodu hooseeyo.



## Waa maxay Barbaarinta Caruurta?

Barnaamijka Barbaarinta Caruurtu wuxuu taageeraa qoysaska ay u joogaan carruurta da'doodu ay u dhaxeyso dhalashada ilaa saddex jir kuwaas oo qaba dib u dhacyada ama naafooyinka koritaanka si markaa ay u helaan bilowga ugu wanaagsan nolosha ee suuragalka ah.

Xirfadlayaasha barnaamijka Barbaarinta Caruurta waxay la shaqeeyaan qoyska canugga si ay u aqoonsadaan awoodaha iyo baahiyaha waxna uga qabtaan walaacyada korriinka goor horeba sida ugu dhakhsaha badan ee suuragalka ah. Adeegyada waxaa laga bixiyaa halka qoysaska ay ku nool yihiin, ku ciyaaraan, kuna qaataan waqtigooda maalinta.

Barbaarinta Caruurtu waxaa laga heli karaa meel kasta oo ka mid ah gobolka waxaana heli kara canug kasta oo u qalma, iyada oo aan loo eegeynin dakhliga qoyska.





## Waa maxay Booqashada Guriga?

Booqashada Guriga waa adeeg iskaa ah, oo guriga ku saleysan oo qoyska lagu siiyo si bilaash ah. Soo booqdayaasha xanaaneynta iyo xirfada leh ee guriga waxay qoysaska ku xiraan xog iyo ilo taageero caafimaadka dhallaanka iyo qoyska oo dhan.

Taageerada Booqashada Guriga waxay hagaajin kartaa natiijada uurka waxayna qoysaska gacan ka siin kartaa u diyaargaroobidda dhallaanka dhalanayo. Xitaa kadib marka uu dhallaanka dhasho, Booqashada Guriga waxay qoysaska ka caawin kartaa inay wax ka bartaan quudinta, hurdada, iyo sida looga dhigo canugga dhallaanka ah mid badqabo oo kobcayo.